Minneapolis waxay dejisay sharciyo khuseeya cuntada iyo cabitaanka la iibinayo.

- Meheradaha cuntada ee shatiga ka hela Minneapolis waxaa khasab ku ah in ay raacaan sharciyada deegaanka ama Green to Go
- Cuntooyinka xafladaha, isbitaallada, iyo guryaha dadka waaweyn lagama rabo sharciyada Green To Go

Sharciyada Green To Go waxa ay khuseeyaan waa cuntada iyo cabitaanka isla markiiba la cuno ama gacanta lagu sii qaato. Cuntooyinka iyo cabitaanka noocaas ah waa in dadka lagu siiyo weelal ah:

- Kuwa dib loo isticmaali karo
- Kuwa dib loo warshadeyn karo
- Kuwa ciidda ku dhex milmaya

## Caagag dib loo warshadeyn karo

Caag kasta oo dib loo warshadeyn karo waa in ay ka muuqato fallaaro ah goobaabin 1, 2 ama 5.



## Caagagga ciidda ku dhex milma

Caagagga ciidda ku milma waxaa ku calaamadsan shaabbad ah BPI.



## Bacda madow

Bacda madow waa qashin.

- Jooji in aad wax ku gurato bacda madow ee qashinka
- Goobaha degaanka ee qashinka dib u warshadeeya ma qabtaan bacaha madmadoow



## Waxaa mamnuuc ah

- Caagga lambar 6 (isticmaalka halka mar)
- Styrofoam™ (koob cad oo hal mar la isticmaalo)



minneapolismn.gov/green-to-go

FFor reasonable accommodations or alternative formats please contact Environmental Health at health@minneapolismn.gov or 612-673-2301. People who are deaf or hard of hearing can use a relay service to call 311 at 612-673-3000. TTY users call 612-263-6850.

Para ayuda, llame al 311. Rau kev pab 311. Hadii aad Caawimaad u baahantahay wac 311.

## Cuntada la daadinayo




Makhaayad kasta waa in ay diyaariso meelo kala duwan oo lagu daadiyo cuntada hanbada ah.

- Waxyaabaha dib loo warshadeyn Rkaro waa in dib loo warshadeeyaa
- Bacaha dib loo warshadeeyo waa in lagu so ururiyaa waxyaabaha orgaanigga ah loona adeegsadaa bacrinta

## Alaabta qaarkood

Alaabta hoose shaqo kuma laha sharciga Green To Go:

- Macalgad iyo fargeeto caag ah
- Caagga dhuuban ee wax lagu cabbo
- Caagga yar ee wax lagu walaaqo



## Talooyinka alaabta

- Weydii dadku in ay rabaan alaabta, kuwa caagga ah ee yaryar. Waxaad dadka siisaa markay rabaan oo keliya.
- Waxaa magaalada ka yaraanaya kharshka gubista qashinka

## Cuntada baakadeysan ee la iibinayo

Cuntada iyo cabitaanka weelal lagu qaadanayo waa in loo raaco sharciyada Green To Go. Waxaa sharciga ka baxsan:

- Cuntooyinka warshadeysan, ee u diyaarsan in la sii iibiyo
- Balaatiig kasta oo dhumucdiisu ka weyn tahay dun

## Ka digtoonow

Waxyaabaha qaar ayaa sharci ahaan loogu oggol yahay in ay u fiican yihiin deegaanka ama bey'adda ama Green To Go.

## Degmada Hennepin




Degmada Hennepin waxay meheraduhu hawshan uga heli karaan deeq lacageed, calaamadeyn, iyo caawimaad ah mid farsamo. Booqo hennepin.us/business recycling, kala soo xiriir businessrecycling@hennepin.us oama 612-543-9298.

minneapolismn.gov/green-to-go